(Bishii 9aad ee 2023 – 5aad ee 2024)

# DARAASAD LAGA SAMEEYAY SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA PUNTLAND

CAGEY

Mr. Mohamed Ahmed Yusuf
Moqor2@gmail.com
+252907791445
August, 2024

# TUSMADA

SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA PUNTLAND ........ 2
HORDHAC ........ 2
MAXSUULKA NATIIJADA DARAASADDA ........ 3
RAADADKA KA DHASHAY SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA ........ 5
DHALINYARADA DARAASADDA KA QAYB GASHAY ........ 7
DHALINYARAD SHAQO LA'AANTA AH E DARAASADDA KA QAYB QADATAY ........ 8
CAQABADAHA DARAASADA INTII AY SOCOTAY ........ 9
CAWAAQIBTA KA DHALATAY DHIBAATOOYINKA SHAQO LA'AANTA DHALINYARADA PUNTLAND ........ 9
TALO SOOJEEDIN TIXGELIN MUDAN: ........ 9
GUNTII IYO GABAGABADII ........ 12
DEGMOOYINKA DARAASADDA LAGA DIWAAN GELIYAY ........ 13

CAGEY

# SHAQO LA’AANTA DHALLINYARADA PUNTLAND

## HORDHAC

Puntland in ay qayb weyn ka tahay Somalia dhul ahaan waxa u dheer in ay nasiib u yeelatay in ay marti geliso labada badood ee Somalia mara (**Badda Hindiya iyo Gacanka Cadmeed**), waxa intaas dheer in Puntland ay tahay gobol hodon ku ah dhinaca **Beeraha**, **Dhaqashada Xoolaha**, **Xabkaha, Faleenka**, **kaluumaysiga**, **Baayac Mushtarka** iyo **Dalxiiska** oo ah illaha dihin ee aan weli la iba furin.

Dhallinyaradu waa xooga iyo khayraadka ugu muhiimsan ee **Puntland** leedahay iyo awood laga yaabo in aan laga faa'iideysan, sida Soomaaliya inteeda kale, Puntland waxaa ku nool dhallinyaro da'yar qiyaastii 55 boqolkiiba xubnaha qoysku waxay da'doodu ka yar tahay 15 jir, iyo 42 boqolkiiba dadweynaha Puntland waxay ku jiraan da'da shaqada iyo wax soosaarka sida aan kasoo xiganay (***Puntland Report 2020 Somali Health and Demographic Survey***).

Puntland waxay leedahay tiro dhalinyaro ah oo muruq iyo maskax ahaan aan laga faa’iidaysan, nasiib darro heerka shaqo la’aanta ee dhallinyarada Puntland waa mid aad u sareeya hadana sare u kacay todobadi (7di) sanno ee u dameesay, ku dhowaad **80%** dhallinyarada Puntland ee darasadaan ka qayb gashay waa **shaqo la’aan ay saamaysay baagamuundo lixaad leh.** Daraasaddu waxa ay isticmaashay xog aruurin laga diwaan geliyay ***3,517*** dhallinyaro ah oo ku sugnaa ***11 degmo*** oo Puntland ku yaala .

Heerka shaqo la’aanta dhallinyarad **Puntland** ee daraasadan ka qayb gashay waxa uu tilmaamaya **( 77.85% )** heer aan indhaha laga qarsan karin oo qarka u saran in ay isu bedesho aafo bulsho (***Social problem***), taas oo horseedi karta xaalado ay khatari ka dhalan karto hadii aan si cilmiyaysan loo wajihin oo aan xeel dheerayaasha arimaha dhaqaalaha iyo bulshadu aanay hoga tusaalayn xalal suurtagal ka dhigaya in xal loo helo arimaha shaqo la’aanta ee haysta dhallinyarada Puntland.

Faqriga iyo shaqo la'aanta ayaa muddo dheer loo arkayay inay yihiin kuwa go'aamiya oo door ka qaata rabshadaha, amni darrada, xasilooni darrada bulshada iyo degananasha la’aanta oo ay Soomaaliya la daala dhacaysay dhawr iyo soddon ki sano ee u dameeyay, haddaba shaqa abuurku waa xalka ugu haboon ee wax looga qaban karo dhibaatooyinka kor ku xusan.

Sida aan kasoo xiganay (***Heritage Institute April 2022***) heerka shaqo la'aanta ee dhallinyarada waa mid aad u walaac badan 69.4% dhallinyarada la waraystay waa shaqo la’aan, sido kale tani waxa ay waafaqsan tahay warbixinti ay soo saartay (UNDP 2012), taas oo lagu xusay in dhallinayarada Soomaaliyeed 67% ay shaqo la’aan yihiin. Intaa waxaa dheer, warbixin ay qortay IOM ayaa lagu xusay shaqo la'aanta dhalinyarada in boqolkiiba 80 (80%) dhallinyarada Soomaalidu tahay shaqo la’aan, tani waxa ay muujinaysa baaxadda shaqo la’aanta ay wajahayaan dhallinyaradu.

Dhallinyaradu waa khayraadka, xooga iyo farsamada uu leeyahay dal waana isha wax soo saar ee ugu muhiimsan marka laga hadlayo illaha wax soosaar (**Factors *of Production***) ee uu wadan leeyahay. Dhallinyaradu waa mulkiilayaasha iyo jaan gooya yaasha maanta iyo tan mustaqablka ee iman doonta,

wadan kasta waxa uu dunida inteeda kale dheer yahay fursadaha iyo adeegyada isku filnaansho ee uu ugu tala galay ama u diyaariyay dhallinyaradiisa, taas oo macno u yeesha dhallinyarada wadankaas.

Waxa aan daraasadan xooga ku saari doona u kuur gelidda shaqo la'aanta baahsan ee dhallinyarada Puntland taas oo ay ka qayb geleen qaybaha kala duwan ee **Dhallinyarada**, **Bahda Waxbarashada**, **Haweenka**, **Ganacsatada** iyo **Waxgaradka qaybihiisa kala duwan**, ujeedada laga leeyahay waxa weeye in la helo maxsuul natiijo dhal ah oo lagaga go'aan qaadan karo sidii wax looga qaban lahaa aafada shaqo la'aaneed ee saamaysay dhallinyarada Puntland.

Cabsida ugu weyn ee ay maanta wajahayaan dhallinyarada Puntland ee ay ka siman yihiin kuwa sanado badan waxbarasho u soo maray rafaad iyo duruufo adag, iyo kuwii aan ba helin fursadaasi waxbaarsho waa hubanti la'aanta iyo sugnaan la'aanta helitaanka fursad shaqo oo ay dhallinyaradu leedahay muruqii, maskaxdii iyo xirfadii shaqadaas lagu qaban lahaa.

Waxa ay dhallinyarada Puntland weyday fursadii ay ku kobcin lahaayeen, oo ay kuso bandhigi lahaayeen awoodaha qarsoon iyo hibbada ku duugan ee larabo in lasoo bandhigo oo bananaka la keeno si looga faaiidaysto oo dadka iyo dalkuba ka faaiidaystaan maskaxda, muruqa iyo aqoonta ku duugan dhallinyarada.

Sannad walba waxa waxbarashada jaamacadaha dalka gudihiisa iyo wadamada dunida kaso qalin jebiya kumanaan dhallinyaro ah oo leh han iyo himilooyin qurux badan oo ay rabaan in ay ku horumariyaan noloshooda iyo nolosha qoysaskooda oo horseedi karta horumar waara oo uu dalku gaaro. Nasiib darro himilooyinka iyo hanka caynkaas ah ma helo kaalmo iyo taageero ku filan waxana ay badi ku dhex dhintaan dhallinyarada oo ay ku beeraan welwel iyo niyad jab mararka qaarkood gaarsiiya heer quus ah.

Marka la fiiriyo dhinaca shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ganacsiyada kala duwan maamula, waxa ay door muhiima ka qaateen shaqaalaysiinta dhallinyarada inkasta oo shirkadahaasi tiradodu ay yartahay oo aanay jirin koriimo ku socota shirkadaha ganacsiga si ay dhallinyaro badan u helaan fursado shaqo oo ay noloshooda iyo nolosha qoysaskooda ku maareeyaan, waxa dhanka kale ku socda dhallinyaradda koboc baahsan tiro ahaan, oo sanad walba waxa soo baxaya hormooyin hor leh oo wax bartay oo u baahan fursado shaqo in ay helaan, waxa intaas dheer tirade kale ee dhallinyarada muruq-maalka ah oo iyana suuqa soo gelaya si ay fursado shaqo u heli lahaayeen oo ay noloshooda iyo nolosha qoysaskooda u hor marin lahaayeen.

## MAXSUULKA NATIIJADA DARAASADDA

Dhallinyarada ka qayb qaadatay daraasaddan waxa ay xuseen in qodobada hoose ay gundhig u yihiin shaqo la'aanta dhalinyarada Reer Puntland saamaysay:

- **B. 21%** Waxa ay xuseen in hab qorista shaqo ee aan cadaalada iyo sinaanta ku dhisnayn (Unfair recruitment practice) ay keentay shaqo la'aanta dhallinyarada
- **T. 11%** waxa ay sheegen in wadanka oo aan lahayn wershado wax soosaar oo dhallinyarada fursad shaqo siin lahaa ay sababeen shaqo la'aanta dhallinyarada ku habsatay
- **J. 18%** Waxa ay tilmaamaysa in Musuq-maasuqa (High level corruption) oo ah tusiyaha labaad uu yahay aafada labaad ee ugu weyn ee abuurtay shaqo la'aanta baahsan ee saamaysa dhallinyarada
- **X. 7%** Waxa ay muujiyeen in korarka dhallinyarada sanad walba ka qalin jebinaya jaamacadaha iyo isu dheelitirnaanta la'aanta fursadaha shaqo ee ka jira suuqa ay gundhig u tahay shaqo la'aanta

**KH**. **8%** Waxa ay ku war bixiyeen in kala duwanaansho la'aanta kuliyadaha cilmiga ee labarto (University Faculties) ay sababtay in dhallinyaradu ay noqdaan baaga muundo.

**D.** **3%** Waxa ay sheegen in dhallinyrada oo aan helin maaligelin ay ku hirgeliyaan hal abuurkoda ganacsi ay sabab u tahay shaqo la'aanta dhallinyarada dhexdeeda ah

**R.** **12%** Waxa ay muujiyeen ka hortag la'aanta shaqaalaha shisheeyaha ah ee haya shaqooyin ay dhallinyarada PL qaban karaan in ay dhaliyeen in dhallinyaaro badan ay noqdaan shaqo la'aan.

**S.** **7%** Waxa ay sido kale muujiyeen in dhallinyarada oo ay ku yartahay xirfadaha hal abuurka ganacsiga iyo xirfadaha horumarinta nolosha ay kalifeen in dhallinyaradu ay noqdaan shaqo la'aan.

**SH**. **7%** Waxa ay ku war bixiyeen in Maqnaanshaha maalgashiga caalamiga ah ee qaybaha wax soo saarka dalka oo door fiican ka qadaan laha shaqa abuurka dalka

**DH**. **6 %** ayaa sheegay in maqnaanshaha barashada farsamada gacanta noocyadeeda kala duwan ay sabab u tahay in dhallinyarao badan oo shaqo gal ah ay noqdeen shaqo la'aan.

Sida ay xuseen dhallinyarada daraasada ka qayb qaadatay habqorista shaqo ee aan cadaalada ahayn iyo eexda oo ay weheliyaan qof jeclaysigu ayaa noqday qodobada safka hore kaga jira shaqo la'aanta baahsan ee dhallinyarada Puntland ku habsatay. Marka laga hadlayo helitaanka fursad shaqo maaha muhiim heerarka aqooneed ama farsamooyinka iyo xirfadaha uu leeyahay qofka shaqadoonka ah, waxase muhiim ah dadka hogaanka u haya qofka shaqada doonaya ama dadka soo diray ee daaha gadaashiisa taagan kuwaas ayaa ah halbeega fursad curiyayaasha shaqa helista dhallinayarad Puntland.

Waxa sido kale shaqo la'aanta dhallinyarada sare u qaaday heerka musuqa oo aad u sareeya oo ay Puntland lawadaagto Somalia inteeda kale oo aynu ka mid nahay wadamada dunida hogaanka u haya dhinaca musuqa muusuqa, waxa sidoo kale ay daraasadu muujisay in ay jiraan kala duwanaansha la'aan kuliyadaah cilmiga ee dhallinyaradu barato iyo in kuliyada badan oo muhiima inaan xooga la saarin sida kuliyada ***Xanaanada Xoolah***a, ***Kaluumaysiga***, ***Beeraha*** iyo ***Deegaanka & Macdanta***.

Waxa intaas dheer in daraasadani ay iftiimisay in shaqooyin doora oo ay aqoonteeda iyo xirfadeeda lahaayeen dhallinyarada ku nool Puntland in ay gacantooda ka bexeen oo ay lawareegeen shaqaale shisheeye ah, kuwaas oo qaar kood aysan haysan ogolaanshaha shaqada (***Work Permit***), haddaba waxa ka mid ah shaqooyinka ay la wareeegen ajaaniibtu ee dhallinyaradu xustay:

- Noocyada kala duwan ee dhismaha
- Duminta gurayaha, masaajida iyo goobaha dib loo cusboonaysiinayo
- Shaqooyinka la xiriira tignoolajiyada & macluumaadka (Information technology)
- Shaqooyinka Hay'adaha
- Huteelada
- Macalinimada & Caafimaadka
- Waxsoosaarka Beeraha
- Gaadiidka Magaalooyinka ka dhex shaqeeya
- Tima jarayaasha
- Shaqooyinka la xiriira xamaaliga iyo dejinta ama rarista gaadiidka
- Baalashka

Waxa xusid mudan in Puntland dadka ajaanibka ah ee ku soo gala sifooyinka aan sharciga ahayn ay si xor ah uga shaqaysan karaan deegaanada Puntland oo dhan, waa arin aan dunida horumartay iyo dawladdaha kale ee dunida aan ka jirin, qofku marka uu doonayo in uu xirfad ama xoogiisa ku shaqaysto ee uu joogo wadan kale waxa muhiima ah in uu haysto ogolaanshaha shaqada (***Work Permit***). Waa door muhiima oo

ay dawladdu ku ilaalinayso bedqabka qofka iyo qoyska ee dadweynaha wadankaas, haddaba Puntland yaa u maqan dadkeeda ! waxa arintaasi ay abuurtay in dhallinyaradii wadanka ay u hayamaan safaro dhaadheer oo khatar badan oo ay ku baadi goobayaan nolol iyo in ay xasilooni bulsho.

Waxa intaas dheer in dhallinyarada Puntland ay caqabad weyni ka haysato helitaanka maalgelin ay ku curiyaan fikradahooda ganacsi ama hal abuur, waxa iyana meesha ka maqan doorki maalgashiga caalamiga lagu keeni lahaa Puntland si maalgashi loogu helo wax soosaarka dalka gaar ahaan khayraadka dihin.

Waxa iyana door fiican ka qaatay shaqo helista dhallinyarada hay'adaha samafalka, gargaarka iyo horumarinta ee ka hawl gala Puntland, inkasta oo hay'adaha qudhoodu ay tiradoodu yartahay waxa aad uga fara badan dhallinyarada u hamuun qabta helista fursado shaqo. Waxa muuqata in dhallinyaro badan oo xirfad layaal ah lana shaqayn jiray hay'adaha ay u wareegeen gobolada kale ee Somalia oo ay hay'adaha samafalka, gargaarka iyo horumarintu ay mashaariic mugleh kawadaan, kuwaas oo aan Puntland ka socon sababo is maan dhaaf siyaasadeed awgeed.

Waxa xusid mudan in hay'adaha qudhooda ay jiraan shaqooyin ay aqoonteeda iyo farsamadeeda leeyihiin dhallinyarada Puntland, hase yeshe ay suurtagal tahay in ay qabtaan shaqaale shisheeye ah (***Foreigners/expatriate***), waxa arintaasi ay dhallinyarada Puntland ka hor istaagaysa helitaanka fursado shaqo ay xaq u lahaayeen waxana muhiima in uu jiro shuruuc ilaalinaya helitaanka shaqo ee muwaadinka.

Waxa intii daraasadu socotay soo if baxday in dad door ah oo leh ganacsiyo kala duwan oo aan fursad u siin dhallinyaradooda in ay ku tababartaan goobohooda ganacsiga oo ay badanaa ka ilaaliyaan in dhallinyaradoodu ay lug ku yeeshaan ganacsiyadooda kala duwan, gaar ahaan dhallinyarada ku jira dugsiyada sare iyo jaamacadaha. Waxa cajiiba hadii aan dhallinyarada la tababarin inta ay yaryihiin oo aan la dhex gelin ganacsiga iyo la macaamilka dadka, waxa adkaan doonta sida hadhow loo jiheeyo ama ay u noqdaan dad u hogaansama awaamiirta iyo waajibaadka goobaha shaqada.

Qaar ayaa aaminsan hadii dhallinyaradu lug ku yeelato waxa hanti ee la haysto ama ganacsiga soo dhex gasho waxa ay u horseedi karta in ay waxbaarshada ka tagaan oo uu dhaqaaluhu lumiyo, kuwa kale waxa ay gebi ahaan ba diidan yihiin in dhallinyaradu ogaato dhaq dhaqaaqooda maaliyadeed iyo waxa ay haystaan.

Sababaha kor ku xusan waxa ay curyaamiyeen waaritaanka ganacsiga ee dadweynaha , waxa adag in Puntland gudaheeda in la arko ama la helo shirkado gaancsi oo jiil ba jiil u soo dhiibay oo hadana shaqaynaya, waxa ay ka qayb galayaasha daraasadan ay sheegeen in qof iyo xoolihiisu ay isla dhamaadaan

## RAADADKA KA DHASHAY SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA

Raadadka taban ee shaqo la'aantu dhalisay waa kuwo durba ay muuqato saamayntoodi waxana ka mid ah:

- Waxa abuurmay kooxo burcad badeed hubaysan ah oo gaaf wareega xeebaha Puntland iyo marinada caalamiga ah si ay uga so afduubtaan maraakiib dabadeedna ay uga qaataan madax furasho (Ransom), tani waa cadaadis ka dhashay shaqo la'aanta ay dhallinyaro badan dareemeen taas oo tusisay in ay u bareeraan khatar walba oo ay ka heli karaan dhaqaale iyaga oo haligaya naftooda.

- Guud ahaan Puntland waxa sare u kacay isticmaalka maandooriyaha oo waxa uu maraya meelo aan la xakamayn karayn, waxa abuurmay silsilado isku dhafan oo ka ganacsada maandoriyayaasha noocyadooda kala duwan. Magaaloyinka waaweyn waxa badanaa la maqlaa is rasaasayn ba'an oo ay is weydaarsanayaan dadka ku hawlan ka ganacsiga maandooriyaha mararka qaarna waxa ay ba fooda is geliyaan ciidamada amaanka oo waxa ka dhasha khasaaro dhimasho iyo dhaawac leh.


- Waxa kor u kacay heerka tahriibka dhallinyarada oo waxa abuurmay shabakado dadka dhallinyarada ah ka tahriibiya gudaha Puntland, kuwaas oo dhallinyarada ku dhiirigelinaya in aan wax lacag ah la weydiinayn dhallinyarada ilaa Libiya la geeyo, bedelkeeda dhallinyarada waxa la siinaya adeegyo kala duwan oo ay ka mid yihiin adeegyo (shopping) iyo in la dejiyo hotelo qaali ah, inkasta oo aan loo shigin dhallinyarada in lacagtaas dib looga dalacayo marka ay gaaran ama ay cagaha dhigaan Libiya ayaa waxa qofkiiba madaxiisa la dul dhigaya aduun lacageed oo gaaraya **$18,000** (Sideed iyo toban kun oo doolar). Waxa qaarkood ay shaashadaha warbaahinta gaar ahaan warbaahinta bulshada kasoo muuqdeen iyaga oo codsaanaya in lacaawiyo kuwa nasiibka leh waxa ka mid ahaa qaar ay dad is-xilqaamayaal ah u keceen oo la caawiyay.
- Shaqo la'aanta baahsan ee ku habsatay dhallinyarada Puntland oo ahaa labeenta iyo laf dhabarta dhallinyarada Soomaaliyeed ilaa iyo gobanima doonki waxa ay geyaysiisay wax aysan u qalmin ama aysan istaahilin. Dhallinyaro fara badan ayaa duruufaha shaqa la'aantu ku khasbeen in ay ka qayb qaataan dagaalada qabaa'ilka ku salaysan, qaar ayaa ku naf waayay kuwo kale waa ay ku naafoobeen, kuwa kale waxa kaso gaaray dhaawacyo kala duwan, halka kuwa kale looga faa'iidaystay duruufaha baahiyood.
- Waxa dhamaadkii sanadkii tegey ee (2023), iyo horaanti sanadka 2024 la diwaan geliyay in ka badan **15 dhallinyaro** ka shaqaysta xeebaha puntland oo quusayaal ah in ay badda gunteeda hoose ku dhinteen, iyaga oo isticmaalaya hawo (oxygen) macmal oo loo yaqaan "Hoo Nuug" si ay badda gunteeda uga soo jilaabtaan Aargoostada (Lobster), waxa ay dhallinyaradu halista intaa leeg naftooda ugu biimaynayaan waa in ay ka cararayaan fursadaha shaqo la'aaneed ee saameeyay dhallinyarada filkood ahaa.
- Shaqo la'aantu waxa ay dhalisay muruq iyo maskax guur (***Barin Drain***), dhallinyaradii Puntland ee muruqa iyo maskaxda larabay in ay wax soosaarka wadanka ka qayb qaataan waxa ay u hayaameen dunida dacaladeeda iyaga oo raadinaya in ay helaan fursado shaqo oo ay ka waayeen jabadyadii ay kuso barbaareen.
- Waxa kor u kacay tirada dhallinyarada iyo bulshada qaybeheeda kala duwan ee la ildaran xanuunada dhimirka oo leh heerar kala duwan (***Mental Health Issue***), kuwaas oo badana ka dhashay isku buuq ku dhacay dhallinyarada ka dib markii ay waayeen shaqooyin ay ka maareeyaan nolosha qoysaskooda iyo baahiyahooda gaarka ah. Waxa ay baahisay ***WHO*** (***Hay'adda Caafimaadka Aduunku***) daraasad caafimaad oo muujinaysa in heerka xanuunada dhimirka uu aad u sareeyo Somalia, bulshaduna aanay aad ugu baraarugsanayn ahmiyada ay leedahay ka hortagga iyo daaweynta xanuunada dhimirka oo leh noocyo iyo qaabab kala duwan.

Waxa xusid mudan in aanay ka jirin Puntland hirgelinta shuruuc iyo xeerar ka shaqeeya, ilaaliya xuquuqda shaqaalaha hadii aynu tusaale u soo qaadano **mushaharka uga yare** (***Minimum Wages***) ee lasiin karo qofka shaqaalaha ah ee haysta shahaado jaamacadeed ee ka hawl geli kara goob ganacsi ama maamul xafiseed I.W.M.

Fursadaha shaqo helitaan ee ay dhallinyaradu helayaan aad ayay u yartahay oo waxa ay aad uga hoosaysa tirada dhallinyaro ee muruq iyo maskax ahaan u diyaarsan in ay kusoo biiraan suuqyada shaqada iyaga oo raadinaya in ay ka gun gaaran himiloyin iyo bartilmaameedyo nololeed oo ay rabaan muddana ay ku haminayeen in ay gaaraan. Waxa daraasadan ka qayb galay **3,517** dhallinyaro joogta Puntland ah oo isugu

jira dhallinyaro dalka gudihiisa iyo dibadiisa wax kusoo bartay heerarkooda aqooneedna ay kala duwanaayeen. Waxa sido kale ka qayb qaatay **132** macalimiin jaamacado, machadyo iyo **85** maamulayaal goobo ganacsi. Daraasadani waxa ay socotay muddo dhan 9 bilood ah (***Bishii 9aad ee 2023 – 5aad ee 2024***), waxana ay daraasadu xog ururintan ka samaysay magaaloyinka, **Bosaso**, **Qardho**, **Garowe**, **Galkayo**, **Badhan**, **Galdogob**, **Buurtinle**, **Dhahar**, **Eyl, Carmo** iyo **Waaciye**. Shaxdan hoose waxa ay muujinaysa heerarka aqooneed ee dhallinyarada ka qayb qaadatay daraasadan.


## DHALINYARADA DARAASADDA KA QAYB GASHAY




Dhallinyarada kor ku xusan qaarkood waxa ay xuseen in ay shaqadoon firfircoon ahaayeen (**Active job seeker**) lixdii bilood ee u dameesay markii ay daraasada ka qayb qaadanayeen, haddaba waxa xusid mudan in ay dhallinyaradda ka haysato caqabado waa weyn helitaanka fursadaha shaqada si siman, oo waxa badanaa shaqooyinka lagu helaa siyaabo aan waafaqsanayn mudnaanta shaqada (***Merit Based***)

Sida aan kaso xiganay daraasado horay looga diwaan geliyay raadadka shaqo la'aanta baahsan ee haysta dhallinyarada Puntland waxa ay kor u dhaaftay 70% in ay dhallinyaru yihiin baaga muundo aan shaqo hayn oo xaafadaha iyo guryaha ku ah dulsaar, halkii la rabay in ay qayb muhiima ka qaataan wax soosaarka iyo ka qayb qaadashada goobaha shaqada oo lagu tartamayo sidii loo soo saari lahaa jiilal awoodooda maskaxeed iyo tan muruqooda ku jirta laga faaiidaysto. Sida hoos ku xusan daraasani waxa ay sido kale daaha ka qaaday in shaqo la'aanta haysata dhallinyarada Puntland ay tahay arin aafo bulsho ah (*Social Problem*) oo aan indhaha laga qarsan karin loona baahan yahay in looso bandhigo dadka saamaynta ku leh xal u helista mushkiladaha shaqo la'aaneed ee haysta dhallinyarada Puntland. Jaantuska hoose waxa uu muujinaya xogtii laga diwaan geliyay dhallinyaradii ka qayb qaadatay daraasan mudadii ay sooctay ee ku sugna Puntland.

## DHALINYARAD SHAQO LA'AANTA AH E DARAASADDA KA QAYB QADATAY




Sida ka muuqata jaantuska sare, shaqa la'aanta dhallinyarada Puntland waxa ay tilmaamaysa **77.85%**, waxa ay muujinaysa sare u kac ku yimid dhallinyarada shaqo la'aanta ah marka la fiiriyo xogihii horay looga diwaan geliyay Puntland. Waa natiijo u baahan in qorshe siyaasadeed iyo in mid bulsho laga yeesho inta aysan isu bedelin mushkilad aan waxba laga qaban karin, sida gu'gii carabta ee sanado ka hor ka butaacay wadamada waqooyiga qaarada Africa ee ay horseeday shaqo la'aanta soo wajahday dhallinyarada iyo dhaqdhaqaaqyadii dhallinyarada koonfur bari ee qaarada Aasiya gaar ahaan dalka Bangaladesh marki ay dhallinyaradu u dulqaadan waayeen shaqo la'an baahsan iyo in shaqooyinki loo xiray dad gaara ay dhalisay in ay kacaan oo ay sameeyeen rabshado suurta geliyay ugu damayn raysal wasaarihii dalkaas in ay talada wareejisay dalkana hal haleel uga carartay !

Waxa sido kale daraasadu iftiimisay in helitaanka suurtagalnimada fursadaha shaqo ee gabdhuhu ay aad uga hooseeyaan dhigooda wiilasha, tusaale ahaan gabdhuhu goobaha waxbarashada aad ayay ugu badan yihiin, jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada kale ba. Haddaba, iyada oo shaqa la'aantu tahay aafo si weyn guud ahaan dhallinyarada u saamaysay waxa muuqata in ay si aad u daran u saamaysay gabdhaha heer walba wax barashadoodu ha joogte.

Marka la fiiriyo xogta laga diwaan geliyay daraasadan, helitaanka fursad shaqo gabdhuhu waxa ay haystaan suurtagalnimo aad u hoosaysa marka loo barbar dhigo dhigooda wiilasha. Puntland waxa ku yaala in ka badan **10 Jaamacadood**, hal (1) Jaamacad oo keliya ayaa ay gabar hogaamisa oo ay ka tahay gudoomiye jaamacadeed, waa bar bilow fiican, hase yeeshe weli waxa ay u baahan tahay in dadaal badan loo galo sidii ***gabdhuhu ay u heli lahaayeen fursado shaqo oo heerka maamulka dhexe iyo hogaaminta ah.***

Intii aan daraasada wadnay Puntland dhamaan shirkadaha ganacsiga ee waaweyn, sida, *Bangiyada, Xawaaladaha, Shirkadaah Isgaarsiinta, Hotelada Waaweyn, Hospitalada Waaweyn, Garoomada Caalamiga ah* ( **International Airports**) iyo *Goobaha laga dukaamaysto* (**shopping malls** ) ee waaweyn, waxa maamula rag oo gacanta ku haya, taasi waxa ay xoojinaysa sida xadiga shaqa la'aantu ay ugu badan tahay gabdhaha iyaga oo leh aqoonti iyo xirfadii shaqada, hase yeeshe bedelkeeda ay gabdhuhu ugu badan yihiin goobaha waxbarashada.

Waxa iyana soo if baxday in dadka baahiyaha gaarka ah qaba ay fursaduhu uga sii ciriiri badan yihiin dadka kale, taasina waxa ay u baahan tahay siyaasado iyo in ay jiraan habraacyo lagu suurta gelinayo u sinaanta fursadaha shaqo iyada oo ahmiyad la siinayo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.

## CAQABADAHA DARAASADDA INTII AY SOCOTAY

Caqabadaha ugu waaweyn ee ay wajahaysay daraasadani waxa ka mid ah:

- Dhallinyarada oo filanayay inaan shaqo abuur iyo fursado shaqo u raadinayno ama ugu qareemayno
- Dhaqaale ahaan daraasadan waxa ay wajahday duruufo dhaqaale oo adag maadaama daraasada laga sameeyay ilaa 11 degmo
- Wacyiga dadweynaha oo aan badana la qabsan hirgelinta daraasadaha noocan oo kale ah
- Daraasadani waxa ay xooga saartay oo keliya dhallinyarada haysata shahaadooyinka waxbarasho.

## CAWAAQIBTA KA DHALATAY DHIBAATOOYINKA SHAQO LA'AANTA DHALINYARADA PUNTLAND

Shaqo la'aanta dhalinyarada puntland waxaa ka dhashay dhibaatooyin badan oo ay wajaheen dhalinyarada.

1. Shaqo la'aanta baahsani waxa ay ka dhigtay dhalinyaro badan kuwo niyad jabsan oo ay kalsoonidooda liidato, waxana ay noqdeen kuwo u nugul in ay ku biiraan kooxaha burcad badeedka, kooxaha kootarabaanka iyo kooxaha hubeysan.
2. Dhalinyaro badan oo shaqo la'aan ah, oo ay ku jiraan kuwo jaamacado dhameeyay, ayaa qaatay go'aano halis badan oo ah in ay tahriibeen oo ay Puntland & Soomaaliyaba ka hayaamay, iyagoo naftooda khatar gelinaya si ay fursad uga helaan dalal kale, qaar ayaa 15 sanno ka dib laga soo daayay magafayaasha Libiya, waxa ku jira kuwo horay loogu diwaan geliyay dhimasho, qaar ayaan weli raq iyo ruux laga hayn, halka kuwo kale ay xabsiyada dunida buux dhaafiyeen.
3. Dhalinyarada qaar waxa ay barteen isticmaalka maandooriyeyaal kala duwan. Isticmaalka maandooriyayaasha waxa ay u arkaan qaab ay isaga yareyn karaan dhibaatooyinka nolosha, isticmaalka Khaad-ka waxa uu qeyb ka yahay shaqo la'aanta iyo kobaca dhaqaalaha oo aad u yar, waxa sido kale, aad u soo badanaya isticmaalka tubaakada Hindiya ee loo yaqaanno 'tabuu' taas oo dhallinyara badan ay sheegeen in ay isku ilowsiiyaan mushkiladaha nolosha ee shaqala'aantu ay udub dhexaadka u tahay.
4. Ugu dambeyn, waxbarashada waxaa loo arkaa in ay tahay dhabbe lagu gaaro '***nolol wanaagsan'***. Balse heerka shaqo la'aan oo aad u sarreeya waxa ay ka niyad jebisay dhalinyaro badan in ay waxbarashada sii wataan maadaama ay arkaan saaxiibadood jaamacadaha dhameeyay oo aan baagamuunda ah oo xaafadaha weli dulsaar ku ah.
5. Dhalinyarada qaar ayaa ka niyad jabay aadista goobaha waxbarashada, kuliyadaha qaar ee jaamacadaha ayaa isxiray, jaamacadaha iyo machadyada waxbaarshadu waxa ay qabaan in isqorista ( ***Enrollment rate*** ) uu hoos u dhac ku yimid, waxa la aaminsan yahay in hoos u dhaca uu salka ku hayo maadaama ay maalin kasta dhallinyaradu arkaan walaalahood, iyo saaxiibbadood oo shaqo la'aan ah, muddo badana waxbarasho wakhti geliyay, sidaas darteed, waxa ay aaminsan yihiin fikradda ah in waxbarashada aanay u horseedi doonin in ay helaan shaqo wanaagsan iyo nolol fiican. Hab fikirkan waxa ay u badan tahay in uu saameyn taban ku yeesho dalka mustaqbalka fog maadaama aqoonta iyo xirfadda Soomaalida ay sii ahaan doonto mid aanan la hormarinin.

## TALO SOOJEEDIN TIXGELIN MUDAN:

Xal-u-helidda dhibaatada shaqo la'aanta dhalinyarada puntland waa arrin u baahan dadaal wadareed iyo iskaashiga heerarka kala duwan ee dowladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo bulshada guud ahaan. Shaqo la'aanta dhalinyarada Puntland waxa ay ahaan doontaa mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn oo

ay Puntland wajahi doonto tobannaanka sano ee soo socdo haddii aanan lasiin mudnaan. Xal degdeg ah looma helaayo shaqo la'aanta. Waxaa loo baahan yahay qorshe wakhtiga fog ah si loo yareeyo shaqo la'aanta.

Shaqo la'aantu waxa ay dhalisaa nidaamka dowladnimo oo aanan si wanaagsan u shaqeynin, burbur dowladeed, amni darro, iyo musuqmaasuq. Hagaajinta maamulka, xoojinta awoodda hay'adaha dowladda, iyo abuurista jawi ku habboon shaqo abuur ayaa dawo u noqon kara shaqo la'aanta baahsan ee ka jirta Puntland. Laakiin howlahan waa ay adag yihiin waxana ay qaadanayaan wakhti badan, guulo degdeg ahna lagama gaarayo wakhtiga dhaw. Sikastaba ha noqotee, ***Daraasadu waxa ay soo jeedinaysa qodobadan hoos ku xusan:***

1. **WAXBARASHO:** hagaajinta tayada waxbarashada waa dadaal ay tahay in ay u istaagaan dhammaan bahda waxbarashada, baayac mushtarka, dhallinyarada, haweenka, culumaa'udiinka iyo isimada dhaqanku, oo kaashanaya wasaradda waxbaarshada iyo tacliinta sare ee dawladda Puntland. Hase ahaatee, waa in ay ka bilaabataa inaan manaahijtenna waxbaarsho ka dhigno kuwo kor u qaadaya hab fikirka ardayga, oo awood u siinaya ardayguna in uu fahmi karo caqabadaha ku xeeran deegaankiisa, isla markaana loo awood siiyo ardayga in uu abuuri karo xal samata bixin kara baahiyaha bulshadiisa/da. Waxa muhiima oo aan u baahanahay in manaahijteena waxbaarsho ay noqdaan kuwo ay sal dhig u yihiin hal abuur iyo hab fikir casiriyayn (***Craetivty and Innovation***), waxa sidoo kale muhiima hirgelinta machadyada barashada farsamada gacanta (***Polytechnic College***s), kuwaas oo sare-u-qaadaya tayada waxbarashada dhinaca farsamada iyo wax soosaarka gudaha dalka, waxana ka soo baxaya dhalinyaro leh aqoon iyo xirfad baahiyaha bulshada wax ka bedeli kara. Sidoo kale, kala duwanaanshaha culuumta lagu barto jaamacadaha ayaa loo baahan yahay in ay dawladdu door firfircoon ka qaadato. Kuliyada ***X. Xoolaha, Beeraha, Kaluumaysiga, Deegaan iyo Isbedelka cimilada*** ayaa wax soo saarka dalku ku tiirsan yahay in ka badan 67%, hadaba Jaamacadaha Puntland ku yaala waxa la gudboon in ay xooga saaran khayraadka dalku leeyahay iyo sidii ay u soo saari lahaayeen aqoon yahano fahamsan khayraadka ku xeeran kana faaiidaysan kara.
2. **RAADINTA MAALGASHI CAALAMI AH**: Dawladda Puntland waa in ay raadiso maalgashadayaal caalami ah oo si daahfurnaan leh u maalgashada khayraadka wadanka dawladuna ay door muhiima ka qaadato kor joogtaynta maalgashiyada caalamiga ah, si ay dhallinyaradu ugu helaan fursado shaqo oo sharaf leh.
3. **MACLUUMAADKA SUUQYADA SHAQADA:** Xogaha sugan ee laga diwaan geliyaya suuqyada shaqada ee Puntland waa ay kooban yihiin, waxa muhiima in had iyo jeer baahida suuqa lagu jaan gooyo xirfadaha aynu u baahanahay inaan dhallinyaradeena ku qalabayno, dowladda waa in ay awood u yeelataa in ay sameyso xog uruurin la xiriirta suuqa shaqada. Waxa muhiima in la fahmo meelaha ay goddalooloyinku ka jiraan oo ay xirfada dhallinyaraduna gaabiska katahay si kor loogu qaado oo looga hortago shaqala'aanta xirfadaha ku salaysan.
4. **DAAH-FURNAANTA SHAQO QORISTA:** Hannaanka shaqo qorista fursadaha shaqo ee jira ee ay ka faa'ideysan karaan dhalinyaradu waa in uu noqda mid daah-furan kana fog eex iyo nin jecleysi. Dhalinyarada aqoonta leh ee duruufaha adag wax ku baratay waxa ay mudan yihiin in ay helaan nidaam shaqo qoris oo daah-furan, si ay uga dhabeeyaan bartilmaameedyada ay ka leeyihiin nolosha iyo in ay horumariyaan nolosha qoysaskooda si ka wanaagsan duruufihi ay soo mareen. Dowladda Puntland waa in ay arintaasi horseed u noqotaa oo looga dayda (***Walk the Talk***) oo ay wax-ka-beddel ku sameysaa qaabka ay shaqaalaha ku qaadato oo aanan daah-furneyn, waxa sido kale dawladda Puntland waxa laga rajaynaya in ay sameyso istaraatiijiyad ay ku dhiirrigelineyso ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo ururrada aan dowliga ahayn in ay si daah-furan ku qaataan shaqalahooda.

5. **KORDHINTA WAX-SOO-SAARKA DALKA:** *Xoolaha nool, Kaluumaysiga iyo Beeraha* ayaa ah kuwa ugu badan ee wax soo-saarka gudaha dalka, iskaashi dowladda iyo ganacsatada ayaana lagu kordhin karaa wax-soo saarkooda iyo in ganacsatadu ay bilaabaan in alaabaha lagu wershadayo gudaha Puntland, si kor loogu qaado wax soosaarka dalka loona sameeyo shaqo abuur dhallinyarada la daala dhacaysa shaqala'aanta. Dawladda Puntland waxa sido kale lagu dhiiri gelinaya in canshuurta lagu kordhiyo alaabta dibada ka imaneysa ee bedelkeeda ama alaab u dhiganta gudaha dalka lagu wershadayn karo, iyada oo la ilaalinayo caafimaadka iyo bedqabka muwaadiniinta si waafaqsan xeerarka wax soosaarka.
6. Waxa iyana muhiimad weyn loo qabaa wacyigelinta iyo hanuuninta dadweynaha ee adeegsiga khayraadka wadanku hodonka ku yahay sida adeegsiga iyo isticmaalka Kaluunka iyo in bulshada lagu wacyi geliyo isticmaalka kaluunka 7aad kii ba maalin waa in loo asteeya maalinti kaluunka, taasi waxa ay keenaysa inaan kor u qaadno fahamka khayraadka dalka iyo inaan dhiirigelino kaluumaystada ku shaqaynaya xaaladaha adag ee ka jira wadanka. Waxaa sidoo kale muhiim ah in si nidaamsan loo siiyo doomaha kalluumeysiga shatiga kaluumaysiga (***Fishing Permit)*** lagana difaaco kalluumeysatada reer puntland dhibaatada ay kala kulmaan shirkadaha kalluumeysi ee waaweyn ee loo yaqaano (***Jiriifka***), dawladda Puntlaand waxa sido kale laga rabaa in ay cashuurta ka khafiifiso ganacsiyada cusub ee unkamaya si loo dhiiri geliyo shaqo abuurka iyo in ay dhallinyaradu ku dhiiradaan bilowga gaancsiyo cusub.

Hadaba, si kor loogu qaado wax soosaar lagu kalsoon yahay oo leh damaanad qaad bulsho waxa muhiima in la helo koronto qiima jaban oo ay ganacsatau ku dhiiran karaan in ay u bareeraan wershado samaysasho, dawladda Puntland waxa laga sugaya in ay keento ***koronto qiima jaban*** oo la awoodi karo, gaar ahaan korontada ku shaqaysa cadceeda, biyaha iyo dabaysha oo ay Puntland hodon ku tahay.

7. **SANDUUKHA HORUMARINTA DHALINYARADA:** Madaxweyne dawladda Puntland Siciid Abdullahi Deni ayaa ku dhawaaaqay dhamaadki sanadki 2022 sanduukha horumariinta dhallinyarada Puntland shirweynihii dhallinyarad Puntland ee qabsoomay bishii 12aad, waxa ay ahayd yididiilo iyo neecaw qabow oo ay dhallinyarada Puntland ku diirsadeen, hase yeeshe weli dhallinyaardu kama quusan oo waa ay ka dhursugayaan. Dowladda Puntland, ganacsatada Puntland iyo deeq bixiyayaasha caalamka waa in ay iska kaashadaan socod siinta iyo hirgelinta sanduukha horumarinta dhallinyarada dhalinyarada. Waa in aanay lacagtaasi noqonin mid lagu hirgeliyo barnaamij siyaasadeed ama shakhsiyadeed, laakiin ay noqotaa lacag lagu maalgeliyo fikradaha dhalinyarada, dhalinyaraduna ay la yimaadaan fikrado iyo hal abuur gaancsi oo bulshada wax ka bedelaya baahidooda, sanduukha horumarinta dhallinayardana uu maalgeliyaa fikradahaasi iyada oo la raacayo xeerarka iyo nidaamyada maalgelinta aan lahayn dulsaarka (***Zero interest loan***) . Sanduukha horumarinta dhallinayardu waa in uu noqdaa caawiyaha hal abuurka ganacsiga dhallinyarada, gaar ahaan fikradaha ganacsiga yaryar ee aan u baahnayn maalgelin badan, sidoo kale sanduukhu waxa uu door firfircoon ka qaadan doona is dhexgalka dhallinyarada iyo isku xirka dhalinyarada. Waa in sanduukhan ay maamulaan guddi ka madax bannaan fara gellin nooc kasta ay ahaataba oo ay dadku ku kalsoon yihiin, islamarkaana ay leeyihiin khibrad la xiriirta hal abuurka ganacsiga iyo curinta hal abuurka cusub.
8. **TIKNOOLOJIYADDA IYO HAL ABUURKA:** Dunida maanta tiknoolojiyadda waxa ay saameyn weyn ku leedahay sida dadku u shaqeeyaan, shaqooyinka iyo dabeecadaha bini'aadamka. Tiknoolokiyadda iyo hal-abuurka waxa ay fursado shaqo u abuuri karaan dhalinyarada puntland, xarumo hal-abuur oo badan ayaa baahi loo qabaa kuwaasoo si dhab ah u shaqeeya islamarkaana dhalinyarada punland siiya fursad ay ku bisleeyaan hal-abuurkooda kana helaan la talin iyo dhiiri gelin.
9. **XOOJINTA DALADAHA DHALLINYARAD:** Dhalinyarada waa in ay bilaabaan isku-xernaan dhexdooda ah iyo iskaashi sahlaya in dhallinayaradu u diyaarsan yihiin wax wada qabsi,

waxaa dhallinyarada loo maal gelin kara si koox koox ah iyaga marka hore qaadanaya ama baranaya maaraynta ganacsiga la wadaago. Shabakadaha dhallinyaradu waxa ay mar walba la talin iyo hagid ka heli doonaan sanduukha horumarinta dhallinyarada waxa sido kale abuurmi kara jawi xasilooni iyo deganaansho leh oo ay dhallinyaradu uga qayb qaadan karaan koboca dhaqan dhaqaale ee dalka.

10. **QAABAYNTA IYO HIRGELINTA XEERARKA SHAQAALAYSIINTA**:
Dawladda Puntland waxa lagu la talinaya in ay diyaariso oo dhaqan geliso xeerarka shaqaalaysiinta loo siman yahay ee (Equal Employment Opportunity) ee hay'adaha dawaladda, shirkadaha ganacsiga, hay'addaha caalamiga, hay'adaha maxaliga, hay'adaha qaramada midoobay oo ay dawladdu u noqotaa tusaale lagu dayan karo. Wasaarada shaqada iyo shaqaalaha ee DPL waa in ay xeer iyo fulintiisi kasoo saarto shaqaalaha ajaaninbta ee qabta shaqooyiinka ay aqoonteeda iyo xirfadeeda leeyihiin dhallinyarada Puntland, waana in ay ilaalisa xaquuqada shaqaalaha, ee mushaharka, joornatada iyo xaquuqaha kale ee shaqaalaha si waafaqsan xeerarka caalamiga ah iyo heer nololeedka wadanka. Dhanka kale, waxa ay daraasadu ku boorinaysa wasaradda dhallinyarada iyo ciyaaraha ee dawladda Puntland in ay u istaagto u qareemida baahiyaha dhallinyarada gaar ahaan shaqo la'aanta oo ah aafo ay dhallinyaardu wajahayaan sanadahan, waxa iyana mar walba u baahan in kor joogtayn lagu hayo iyo sahan is bedelka ku imanaya suuqa shaqada iyo xirfadaha laga rajaynayo in ay dhallinyaradu kaso qaataan goobaha waxbaarshada, si aanu u samaysmin firaaq xirfadeed oo ay dhallinayarda ku dhaca waxa ay ka caawinaysa in ahd iyo jeer laga hortago inta aanay mushkiladu noqon mid aan wax laga qaban Karin sida hada oo kale.
11. **MAALGELINTA BANGIYADA**: Daraasadu waxa ay bangiyada bixiya maalgelinta ku dhiirigelinaysa in ay dhallinyarada u sahlaan sidii ay dhallinyaradu ku heli lahaayeen maalgelin ka caawisa in ay gaaraan ama xaqiijiyaan bartilmaameedyada ay ka leeyihiin nolosha. Puntland qofka dhallinyarada ah marka uu doono in uu helo maalgelin waxa uu wajahaa caqabado aanu xal u heli karin oo badanka dhallinyarada ka dhiga raja beel, ma jiraan siyaasado iyo aragtiyo qoto dheer oo loo dejiyay bedqabka dhallinyarada iyo adeegyo loogu talagalayba.
12. **DHISMAHA MASKEXEED EE DHALLINYARADA**: Waxa ay sido kale daraasadu soo jeedinaysa in la furo xarumaha tababarka iyo carbiska dhallinyarada shaqa doonka ah, si kor loogu qaado hab fekerka dhallinyarada iyo in shaqadu tahay sharaf dhallinyarada in la abro, si lo cirib tiro in dhallinyaradu ka faanan shaqooyinka qaar
13. **In Hayada shaqaalaha Rayidka Puntland la sameeyo** si ay xuquuqda shaqaaalaha u raadiso
14. **In ay xeer kasoo saarto shaqaalaha ajaaninbta** ee qabta shaqooyiinka yar-yar ee dhalinta ku filantahy si gaara kuwa murug-maalka.
15. **In dhallinyarada laga qayb geliyo in ay bartaan shaqada xili hore,** gaar ahaan xiliyada ay soo gaaraan dugsiyada sare, waxa waalidiinta goobaha ganacsiga leh lagu boorinaya in ay dhallinyarada u ogolaadaan in ay helaan fursad ay wax ku bartaan, waxa sidoo kale waalidiinta guud ahaan lagu dhiirigelinaya in dhallinyarada lagu ababiyo shaqo carbin xili hore.

## GUNTII IYO GABAGABADII

Daraasaddo kala duwan oo horay gobolo ee Somalia ka mid ah laga sameeyay oo ay Puntland ku jirto ayaa soo jeedinaya in xaalada shaqo la'aanta dhallinyarada ay tahay arin walaac iyo walbahaar badan leh oo u baahan in laga yeesho hadafyo siyaasadeed iyo ujeedooyin lagu yarayn karo shaqo la'aanta baahsan eek u habsatay labeenti bulshada. Waxa xusid mudan in dhallinyarada Puntland aanay helin fursadii ay mudnaayeen ee shaqo abuuris, waxa iyana soo baxday in dhallinyarada ay ku yartahay hal abuurka ganacsiga iyo casiriyaynta ***( Creativity and Innovation***) waxa muuqata baahida looqabo in dibu eegis lagu sameeyo manaahijteenna waxbaarsho si loo dhiiri geliyo hal abuurka iyo in kor loo qaado hanka ardayga. Dhamaan heerarka waxbarasho ee kala duwan dhallinyarada laguma tababaro curinta hal

abuurka ka jawaabaya baahiyaha bulshadooda ku xeeran, waxa sido kale soo baxday in gebi ahaan dhallinyarada oo ay ka mid yihiin kuwa bartay ganacsiga iyo dhaqaalaha aanay lahayn ama baran xirfadaha maamulka lacagta iyo fursad curinta.

Waxa sidoo kale muuqata ifafaalada ah in dhallinyarada iyo waalidka gaar ahaan kuwa leh goobaha ganacsiga ay kala durugsan yihiin, waxa lagu la talinaya waalidiinta in ay awood u siiyaan dhallinyarada in ay helaan marino ay ku dhisi karaan xirfadahooda, iyo xirfada ugu muhiimsan ganacsiga ee dad la macaamilka iyo xiriirka bulshadda.

Fursadaha shaqada oo koobna oo ay weheliyaan cadaadisyo kala duwan waxa ay sido kale xayn daab adag geliyeen dadka baahiyaha gaarka ah leh kuwaas oo inta badan aanay u saamaxayn duruufaha iyo goobaha laga shaqeeyana in ay yihiin kuwo door loogu daray dadka bahaiyaha gaar ka ah qaba, sidaasi awgeed waa muhiim iyo lagama maarmaan in masuuliyad layska saaro sidii ay fursaduhu u noqon lahaayeen kuwo loo siman yahay (***Equal Employment Opportunities***)

Ugu damaynti, waxa aan u mahad celinaya dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada, dhallinyaradii iyo macalimiinti wakhtiga iyo dibu eegista ku sameeyay daraasaddan oo dhaxal reeb u noqon doonta dhallinyarada, bulshada iyo dawladda Puntland si horumarin loogu sameeyo meelaha ay god dalooloyinka iyo caqabadaha ka adreemayaan dhallinyarada Puntland.

Waxa an diyaar u ahay wixi sixitaan iyo talo soojeedin ee kale inaan ka dhegaysto akhristayaasha iyo aqoon yahanada kala duwan meel kasta ha joogeene.

**MAHADSANIDIIN**

## DEGMOOYINKA DARAASADDA LAGA DIWAAN GELIYAY

| # | DEGMADA | TIRADA KA QAYB GALAYAASHA | BOQOLEYDA |
|---|---|---|---|
| 1. | Bosaso | 774 | 22% |
| 2. | Carmo | 157 | 4.45% |
| 3. | Badhan | 311 | 8.87% |
| 4. | Waaciye | 141 | 4.01% |
| 5. | Dhahar | 251 | 7.14% |
| 6. | Qardho | 312 | 8.87% |
| 7. | Garoowe | 492 | 13.99% |
| 8. | Eyl | 95 | 2.70% |
| 9. | Buurtinle | 235 | 6.68% |
| 10. | Galkacayo | 503 | 14.30% |
| 11. | Galdogob | 246 | 7% |
| 12. | **Wadarta ka qayb galayaasha darasada** | | |
| | **3,517** | | **100%** |